

Barnaamijka Qiimo-dhimista Baabuurta aan hawada ku sii daynin wasakhda ee Washington (WAZIP)



Casriyeyso gaadiidkaaga xamuulka ah ee dhexdhexaadka ah iyo kuwa culus iyo qalabka aan wadada lagu isticmaalin si aad lacag u kaydsato, u yarayso kharashaadka hawl-galka oo aad ugu wareegto baabuurta aan hawada ku sii daynin wasakhda.

WAZIP waxay bixisaa boonooyinka iibka baabuurta iyo qalabka ganacsiga u qalma ee aan hawada ku sii daynin wasakhda, si aad lacagta horay ugu kaydsato.

Waa maxay WAZIP?

Washington Zero-Emission Incentive Program (WAZIP) waa barnaamijka ugu horeeyay ee heer gobol ee Washington ee lagu dhiiri-galinayo qaadashada baabuurta ganacsiga ah ee aan hawada ku sii daynin wasakhda.

Haddi aad maamushid hal baabuur ama aad maamusho xaamuul wayn, WAZIP waxa ay kuu sahlaysaa in aad awoodo in aad maal gashato baabuurta iyo qalabka aan hawada ku sii daynin wasakhda iyada loo marayo dhiiri-galin dhanka qiimo dhimista ah marka aad iibsantayso.

Sidee WAZIP ii caawin kartaa?

- Qiimo-dhimis lagu samaynayo marka aad iibsantayso, iyada oo aan la sugaynin wax lacag celin ah
- Taageerada khabiirka oo kaa caawiya inaad fahamto qiimo-dhimista, shuruudaha, iyo tallaabooyinka xiga
- Kaydinta muddada-dheer ee shidaalka iyo kharashka dayactirka oo la dhimay

Qalabka aan hawada ku sii daynin wasakhda oo adiga kuu gaarka ah ayaa sidoo kale macnaheedu yahay jawi wanaagsan oo aan dhammaanteen helno.

Sidee ayay u shaqeysaa?

- 1 Ku xidhnow khabiirada WAZIP si aad u heshid hagitaan gaar ah si ay wax kaaga sheegan u-qalmitaanka, qiimo-dhimista, iyo qorsheynta.
- 2 Dooro iibiyaha baabuurka oo la ansixiyay kaas oo bixinaya baabuur ama qalab aan hawada ku sii daynin wax wasakh ah.
- 3 La shaqee ganacsadaha aad dooratay markay kuu codsanayaan qiimo dhimista wakhtiga aad iibsantayso.
- 4 Ka shaqaysii gaarigaaga adiga oo iska baajinaya kharashaadka shidaalka iyo dayactirka adigoo isticmaalaya tiknoolajiyada ka hortagaysa in aan hawada wax wasakh ah lagu sii daynin.
- 5 Ka hel taageero joogto ah khubarada WAZIP ee diyaarka u ah inay ku caawiyaan markay baahidaadu wax iska bedelaan.

Nagala soo xidhiidh:

Booqo websaydkeena wazip.org ama iskaan ka qaad koodka QR si aad wax badan uga barato u-qalmitaanka oo aad isaga diiwaan geliso cusboonaysiinta barnaamijka.



✉ info@wazip.org

WAZIP waxay dardar gelisaa u beddelashada baabuurta ganacsiga kuwa aan hawada wasakhaynin, taasoo suurtagalinaysa helitaanka gaadiid nadiif ah, la awoodi karo, oo ay heli karaan ganacsiyada Washington.

Xeerka VI Oggeysiiska Dadweynaha

Waa xeerka Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington (WSDOT) oo xaqiijinaya in qofna, iyadoo loo eegayo isir, midab, asal qaran, sida uu dhigayo Xeerka VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964, looga reebin inuu ka qaybgalo, loo diidi karin dheefaha, ama aan si kale loogu takoorin mid ka mid ah barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda. Qof kasta oo aaminsan in la jebiyey Xaqooda ilaalinta VI, waxa uu u dacwoon karaa Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ee WSDOT (OECR). Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan nidaamka cabashada Xuquuqda VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibaadkeena takoor la'aanta, fadlan kala xidhiidh xidhiidhiyaha Xuquuqda VI ee OECR lambarka (360) 705-7090.

Macluumaadka Xeerka Muwaadiniinta Ameerikaanka Baahiyaha Gaarka ah Qaba(ADA).

Xogtan waxa lagu heli karaa qaab kale adiga oo iimayl u soo diraya Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah barta wsdotada@wsdot.wa.gov ama adigoo soo wacaya khadka bilaashka ah, 855-362-4ADA(4232). Dadka dhegaha la' ama maqalka ku adag yahay waxay samayn karaan codsi iyagoo ka wacaya Gudbinta Gobolka Washington lambarka 711.

Nooca	GVWR	Qiimo Dhimis kusalaysan Qalabka Wadada lagu Isticmaalo
Nooca 2b	8,501-10,000	\$7,500
Nooca 3	10,001-14,000	\$45,000
Nooca 4	14,001-16,000	\$60,000
Nooca 5	16,001-19,500	\$80,000
Nooca 6	19,501-26,000	\$90,000
Nooca 7	26,001-33,000	\$135,000
Nooca 8	33,001 +	\$175,000

Nooca Qalabka	Qiimo Dhimis kusalaysan Qalabka aan Wadada lagu Isticmaalin
Qalabka Beeraha	Ilaa \$500,000
Xamuul Qaadaha Gegida Diyaaradaha (10,000-20,000 Qaadka Rodolka)	Ilaa \$50,000
Xamuul Qaadaha Gegida Diyaaradaha (>20,000 Qaadka Rodolka)	Ilaa \$100,000
Unugyada Korontada Dhulka ee diyaaradda (GPU)	Ilaa \$124,000
Gawaarida lagu Dhaqaajiyo Diyaaradaha (Asiidhka Balambamta)	Ilaa \$80,000
Gawaarida lagu Dhaqaajiyo Diyaaradaha (Liitiyam ama Shidaalka Baytariga)	Ilaa \$200,000
Qalabka Qaadista Xamuulka (> 33,000 Culayska Rodol ahaan)	Ilaa \$1,000,000
Maraakiibta Xamuulka ee Ganacsiga (19 kW oo cusub oo ku shaqeeya IC)	Ilaa \$1,000,000
Qalabka Dhismaha (\geq 19 kW Awood u dhiganta Qalabka Gubashada Gudaha Ah)	Ilaa \$500,000
Cagafta Culayska Wayn Qaada (8,001-12,000 rodol Awoodda Qaadista) – Baytariga Asiidhka Balambamta	Ilaa \$10,000
Cagafta Culayska Wayn Qaada (8,001-12,000 rodol Awoodda Qaadista)	Ilaa \$15,000
Cagafta Culayska Wayn Qaada (12,001 – 20,000 rodol Awoodda Qaadista)	Ilaa \$20,000
Cagafta Culayska Wayn Qaada (20,001 – 29,999 rodol Awoodda Qaadista)	Ilaa \$80,000
Cagafta Culayska Wayn Qaada (30,000-34,000 rodol Awoodda Qaadista)	Ilaa \$100,000
Cagafta Culayska Wayn Qaada (34,001 – 36,000 rodol Awoodda Qaadista)	Ilaa \$200,000
Cagafta Culayska Wayn Qaada (>36,001 rodol Awoodda Qaadista)	Ilaa \$500,000
Cagafta Culayska Wayn Qaada (>54,001 rodol Awoodda Qaadista)	Ilaa \$1,000,000
Unugyada Matoorada Korontada ee la qaadi karo & eGPU (Liitiyaam)	\$400/kWh ilaa \$300,000 wadarta
Unugyada Matoorada Korontada ee la qaadi karo & eGPU (Unugga Shidaalka)	Ilaa \$300,000
Riixayaasha Tareenada iyo Matoorada tareenada ee tamarta sare leh (20,000 - 35,000 rodol FTE)	Ilaa \$225,000
Riixayaasha Tareenada iyo Matoorada tareenada ee tamarta sare leh (> 35,000 rodol FTE)	Ilaa \$1,000,000
Cagafyada Gegida Diyaaradaha (Baytari-koronto)	Ilaa \$90,000
Cagafyada Gegida Diyaaradaha (Unugga Shidaalka)	Ilaa \$200,000
Unugyada Qaboojiyaha Gaadiidka (TRU) Saaran-Tareelaha	Ilaa \$65,000

Nooca Kaabayaasha	Qadarka ugu badan oo Dabayn karo Gawaarida Korontada / Qaybiyaha Hayroojiinka
Kaabayaasha heerka 2b	\$3,500
Daloolka Dabaynta oo Awoodiisa Dhan tahay \leq 50kW	\$5,000
Daloolka Dabaynta oo Awoodiisa Dhan tahay 51kW - 150kW	\$10,000
Daloolka Dabaynta oo Awoodiisa Dhan tahay 151kW - 350kW	\$20,000
Daloolka Dabaynta oo Awoodiisa Dhan tahay \geq 351kW ama MPU	\$30,000
Qaybiyaha Hayroojiinka	\$30,000

Dib u eeg buuga fulinta WAZIP ee u qalmida qiimo-dhimista iyo faahfaahinta.